Latvia

# XUQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKAAGA SOO-DHAWEYNTA



**Macluumaadkan adiga ayaa laguugu talagalay haddii:**

- aad kayar tahay da'da 18 sano jir
- aad timaaday adigoon la socon waalidkaa kaligaa ama waxaad la socotay xubno kale oo qoyskaaga ah
- aad codsatay magangelyo (oo sidoo kale loo yaqaan ilaalin caalami ah) Latvia

SOMALI

# TUSMADA


Adigu waad ku badqabtaa wadankan 3

Yaa ku caawin doona? 3

Waa maxay doorka wakiilka? 3

Yaa kale ee ku caawin kara? 4

Maxaad heli doontaa? 6

Xuquuqda daryeel caafimaad 8

Ogeysii shaqaalaha iyo wakiilka 9

Qiimeynta waxa ugu wanaagsan ee laguu qaban karo? 10

Xuquuqda waxbarasho 10

Xuquuqda shaqo 11

Dhukumantigaaga magangelyo-doonka 11

Halkee ayaad joogi doontaa? 12

Maxaad samayn kartaa haddii qof si xun kuula dhaqmo? 13

Waa maxay waajibaadkaaga soo dhaweynta? 14

Maxaa dhacaya haddii aanad u hogaansamin waajibaadkaaga? 15

Xeerarka codsashada magangalyo iyo safrida waddamada kale 16

Maxaa dhaca haddii aad u baxsatid mid ka mid ah waddamada eu+? 17

Yaa ku caawin kara haddii aanad ku qanacsanayn go'aanka ay gaareen maamulku? 18

Maxaa dhaca haddii qaar ka mid ah taageerada la beddelo? 19

Faahfaahinta halka lagala xidhiidhayo 20

## ADIGU WAAD KU BADQABTAA wadankaN

Waxaad u sheegtay maamulka in aadan dib ugu laaban karin wadankaagii sababtoo ah waxaad gali kartaan khatar, isla markaana waxaad codsatay magangelyo. Waxaad tahay magan-galyo doon jooga Latvia.

Waa caadi haddii wax kasta kugu cusub yahay. Waxaad ku badqabtaa wadankan oo ma noqon doontid kaligaa.

## YAA KU CAAWIN DOONA?

Yurub gudaheeda, qof kasta oo ka yar 18 sano waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay carruur, wuxuuna xaq u leeyahay in la siiyo **taageero gaar ah**.



Sababtoo ah waxaad joogtaa halkan bilaa waalidiintaada, qofkale oo weyn oo loo yaqaan wakiil ayaa kaa caawin doona baahiyahaaga.

Haddii aadan weli la kulmin  wakiilka, waxaad la kulmi doontaa iyaga sida ugu dhakhsaha badan.

## WAA MAXAY DOORKA **WAKIILKA?**

Wakiilkaaga ayaa kuu sharxi doona wax kasta oo aad u baahan tahay inaad ka ogaato joogitaankaaga, isla markaana kaa caawin doona inaad hesho jawaabaha su'aalahaaga. Tusaale ahaan, sida aad iskuul u aadi karto, sida aad dhakhtar u arki karto, halka aad deggenaan doonto, iyo sida aad u heli karto ama ula xiriiri karto qoyskaaga. Saraakiil kale ayaa sidoo kale kaa caawin doona ka jawaabidda su'aalahan.

Wakiilkaaga ayaa u sheegi doona maamulka waxa aad u baahan tahay, ku siin doona talo, isla markaana kaa caawin doona inaad gaarto go'aanno muhiim ah.

Mar walba waxaad si xor ah u muujin kartaa baahiyahaaga iyo dareenkaaga, sidoo kalena waxaad la wadaagi kartaa aragtidaada wakiilkaaga.

Haddii aad khilaaf kala dhex gasho wakiilkaaga, u sheeg saraakiisha.

## YAA KALE EE KU CAAWIN KARA?



- **Shaqaale bulsho/lataliye** ayaa kaa caawin doona baahiyahaaga maalinlaha ah ama wuxuu la xiriiri doonaa khubaro kale oo kaa caawin kara dhibaato gaar ah.
- **Dhakhtar** ama **kalkaaliye** wuxuu ku caawin doonaa haddii aad dareento xanuun, aad dhaawacanto ama aad u baahan tahay nooc kasta oo kaalmo caafimaad ah.
- **Dhakhtarka maanka** wuxuu kaa caawin doonaa haddii aad dareento murugo, cadho, baqasho, welwel ama ay kugu adkaato hurdada.
- **Lataliye sharci** wuxuu kaa caawin doonaa adiga iyo qoyskaaga inaad fahamtaan waxa dhici kara inta lagu jiro habraaca magangalyada iyo haddii aad rumaysan tahay inaan xuquuqdaada la ixtiraamin.
- **Turjumaan** wuxuu kaa caawin doonaa inuu kugula xidhiidho luuqada aad fahmayso. Doorkoodu waxa weeye iney si sax u turjumaan waxa aad adiga ama dadka kale dhahdaan.

### Waa maxay qiimeynta da'du?




Haddii aad timid Yurub adoon wadan sharci cadeynaya intaad leeg tahay, oo maamulku ka shakiyo da'daada, waxay ku weydiin doonaan inaad kaqeybgashid nidaam loo yaqaan **qiimeynta da'da.** Qaabkani, waxay ku go'aamin karaan inay kuu tixgaliyaan ilmo yar ama aanay kuu tixgalin.
Haddii lagu weydiiyo inaad ka qayb gasho qiimeyn da’da ah, wakiilkaaga ayaa kuu sharxi doona habraaca.

### Maxaad sameyn kartaa haddii aad rabto inaad la xidhiidho qoyskaaga?



- Haddii aadan garanayn halka qoyskaaga joogo ama aad lumisay xiriirkii aad la lahayd, waxaad ka codsan kartaa wakiilkaaga ama saraakiisha in ay kaa caawiyaan. Waxay kaa caawin karaan raadinta qoyskaagii.
- Haddii aanad garaneyn halka qoyskaagii joogo oo aad ka haysid xidhiidh, shaqaalaha ayaa kaa caawin doona inaad wacdid haddii aad rabtid.
- Haddii aad qoys ku leedahay Yurub, u sheeg saraakiisha wax kasta oo aad ka ogtahay qoyskaaga.

### Iska taxadar, dadka qaarkood waxay ku galin karaan khatar



Waxaa laga yaabaa inaad ka fikirto ka bixitaanka dalkaas ama qaar ka mid ah dadka ayaa isku dayi doona inay kugu qanciyaan inaad ka cararto. Waxay kuu noqon kartaa khatar waxayna yeelan kartaa cawaaqib xun oo ku saabsan codsigaaga magangalyo.
La hadal wakiilkaaga iyo saraakiisha; waxaad u sharxi kartaa xaaladdaada, waxayna ku siin doonaan talo.

# MAXAAD HELI DOONTAA?

Waxaad heli doontaan noocyo kala duwan oo taageero iyo adeegyo ah intaad sugaysaan in maamulka baadhaan codsigiinna magangelyo. Tan waxa la dhahaa **soo dhawayn**.


Ka ilmo ahaan iyo magangalyo doon ahaanba waxaad leedahay xuquuqo laakiin sidookale waxa jira waajibaad ku saaran oo ay tahay inaad ixtiraamto. Kuwan waxa lagu sharaxay buug-yarahan.

Shaqaaluhu waxay kaa codsan doonaan inaad xaqiijiso inaad fahamtay macluumaadka ku jira buug-yarahan. Haddii aadan fahmin qayb ka mid ah buug-yarahan ama aad qabto su'aalo, fadlan weydii wakiilkaaga iyo saraakiisha.

Inta aad joogto dalkaas, wakiilkaaga iyo saraakiishu waxay ku siin doonaan macluumaad dheeraad ah oo ku xiran xaaladdaada gaarka ah. Waxaad weydiin kartaan su'aalo wakhti kasta.



**Waxaad heli doontaa**:



- goob aad seexataan



- cunto



- agabka nadaafada gaarka ah



- dhar



- lacag aad u isticmaasho kharashaadka maalinlaha ah

Waxaa lagu siin doonaa sariir, cunto, iyo agabka nadaafadda shaqsiga ah haddii aad ku nooshahay xarunta hoyga codsadayaasha magangelyo ee Xafiiska Arrimaha Jinsiyadda iyo Socdaalka. Gunnadaada maalinlaha ah waxaa la siin doonaa wakiilkaaga.

Haddii loo baahdo, waxaa lagu siin doonaa dhar ku habboon xilliga.

# XUQUUQDA DARYEEL CAAFIMAAD

**Maamulku waxay hubin doonaan inaad heshay daryeelka caafimaad ee aad u baahan tahay.**

**Waxaad u sheegi kartaa saraakiisha iyo wakiilkaaga dhammaan arrimaha caafimaadkaaga.** Waxay kaa caawin karaan inaad aragto dhakhtar ama kalkaaliye haddii aad u baahan tahay.



Haddii dhakhtarku u arko inay lagama maarmaan tahay, wuxuu qori doonaa daawooyin iyo sidoo kale booqashooyin aad ku arki karto dhakhaatiirta takhasuska gaarka ah u leh.

Saraakiisha iyo wakiilkaaga ayaa kuu sheegi doona haddii aad u baahan tahay inaad la kulanto kalkaaliye ama dhakhtar si loo sameeyo baaritaan caafimaad. Waxay baari doonaan caafimaadkaaga waxayna ku siin doonaan caawimaadda lagama maarmaanka ah.

Haddii aad la kulanto xaalad caafimaad oo u baahan gargaar degdeg ah ama wax dhaawac u baahan daaweyn degdeg ah, u sheeg shaqaalaha. Haddii aad ka maqan tahay goobta aad deggen tahay, waxaad wici kartaa lambarka degdegga ah ee bilaashka ah 112.


## U SHEEG SARAAKIISHA IYO WAKIILKA HADDII:






- aad dareemayso xanuun, dhaawacantay ama aad u baahan tahay gargaar caafimaad oo degdega ah ama daaweyn
- aad isticmaasho daroogo ama aad cabto maandooriye
- aad horey u soo martay dhibaato ama xadgudub, ama aad hadda la kulmeyso
- aad uur leedahay ama aad u malaynayso inaad uur leedahay
- aadan kaligaa socon karin ama aad dhibaato ku qabto maqalka iyo aragga
- aad uwalwalsan tahay, murugaysan tahay, seexan weydo ama aad waajahayso fikirro xun
- aad dareento inaanad ammaan ahayn ama aad ka baqanayso qof, ha ahaado qof ajnabi ah ama qof aad taqaan
- lagugu qasbay ama lagugu qasbayo inaad samayso waxyaabo aadan rabin
- aad dareento inaanad badqabin sababtoo ah diintaada, qofka aad jeceshahay, sida aad u labisato ama u dhaqanto.

Xusuusnow in saraakiisha iyo wakiilkaaga ay halkan u joogaan inay ku caawiyaan.



## QIIMEYNTA WAXA UGU WANAAGSAN EE LAGUU QABAN KARO?



Tani waa hawl aad ku arki doonto saraakiil kale oo ku weydiin doona su’aalo si ay u:

- u fahmo **baahiyahaaga**
- u go'aamiyo **taageerada** aad u baahan tahay.

Tani waxay ka caawin doontaa masuuliyiinta inay gaadhaan go’aanno muhiim ah, tusaale ahaan halka aad degi doontid.

Wax kasta oo aad sheegto lama wadaagi doono cid kale adiga oggolaanshahaaga la’aanteed, marka laga reebo wakiilkaaga.

Haddii aadan rabin in wakiilkaaga lagu wargeliyo ama uu arrinta ku lug yeesho, u sheeg saraakiisha. Kaliya waxa ka reeban marka noloshaada ama nolosha qof kale ay halis ku jirto.
Waxaad ku kalsoonaan kartaa kalkaaliyaha, dhakhtarka, saraakiisha, iyo wakiilkaaga.

## XUQUUQDA WAXBARASHO



Ka ilmo ahaan waxaad xaq u leedahay waxbarasho iyo inaad wax dhigato. Haddii aad tagto dugsiga oo aad buuxiso 18 sano inta aad dhiganayso, waad sii wadan kartaa ilaa waxbarashadu kuu dhammaato.

Wakiilkaaga iyo saraakiisha maamulka ayaa kaa caawin doona inaad codsato iskuul. Waxay sidoo kale ku wargelin doonaan fursadaha aad ku heli karto koorsooyin.

Shaqaaluhu waxay ku sheegi doonaan hawlaha waxbarasho iyo madadaalo si ay kaaga caawiyaan inaad barato, horumariso naftaada, isla markaana saaxiibo cusub sameysato.

## XUQUUQDA SHAQO

Iyada oo ku xiran da’daada iyo xaaladdaada, waxaa laga yaabaa in laguu oggolaado inaad ka shaqeyso Latvia haddii aad rabto. Wakiilkaaga iyo saraakiisha Xafiiska Muwaadinimada iyo Arrimaha Socdaalka ayaa ku siin doona macluumaad dheeraad ah.





Iyada oo ku xiran xaaladdaada, waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato shaqo saddex bilood kadib marka la diiwaangeliyo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah ee Latvia, haddii aadan weli helin go’aan ku saabsan bixinta ama diidmada heerka qaxootinimo ama ilaalinta kale, isla markaana aad haysato dukumentiga aqoonsiga codsadaha magangalyada.



Dhammaan wiilasha iyo gabdhaha ka yar 15 sano looma oggola inay shaqeeyaan (marka laga reebo xaalado gaar ah oo laga yaabo in laga oggolaado shaqo laga bilaabo 13 jir).

## DHUKUMENTIGAAGA MAGANGELYO-DOONKA

Waxaad heli doontaa dhukumenti gaar ah oo ay ku jiraan magacaaga iyo sawirkaaga. Tani waxay caddeyneysaa inaad tahay codsade magangalyo gudaha Latvia. Waa inaad had iyo jeer sidataa.



**Dhokumantigani waa muhiim.**
**Ka taxaddar inaadan lumin oo ha siin qof kale.**

Dukumentigan waxaa loo yaqaan dukumentiga aqoonsiga codsadaha magangalyada.

## HALKEE AYAAD JOOGI DOONTAA?

Meesha aad ku degi doonto inta maamulku baadhayo codsigaaga magangelyo waxay ku xidhan tahay xaaladaada.







Wakiilkaaga iyo saraakiishu waxay ku wargelin doonaan halka **lagaa rabo inaad deggenaato**, tusaale ahaan xarun ama magaalo loo asteeyay.

**Waxaad heli doontaa taageero iyo adeegyo kaliya goobta ay u asteeyeen maamulka.**

Marar aad u yar, waxaa dhici karta in carruurta lagu dejiyo xarun aysan si xor ah uga bixi karin ama ugu laaban karin sida ay doonaan. Haddii aad ku jirto xaaladdan, wakiilkaaga, lataliyaha sharciga, iyo saraakiishu way ku caawin doonaan.

**Meel kasta oo aad deggan tahay, waxaad xaq u leedahay inaad badqabto. Qofna looma ogola inuu:**





ku cabsi galiyo ku caayo ku dhibaateeyo

Ha noqoto cidday doonaan, qof aad garanayso iyo mid aanad garanaynba. Haddii aad dhibaato kala kulanto saraakiisha ama wakiilkaaga, waad ka hadli kartaa.

## MAXAAD SAMAYN KARTAA HADDII QOF SI XUN KUULA DHAQMO?



Waxaad arrintan kala hadli kartaa qof aad ku kalsoon tahay, wakiilkaaga, ama sarkaal.



Haddii qof si xun kuu la dhaqmo, waxaad uga warbixin kartaa maamulka si looga hortago in ay mar kale dhacdo. Tan waxa loo yaqaanaa 'samaynta cabasho'.

**Fiiro gaar ah!**

Haddii aad ka maqan tahay goobta aad deggen tahay oo aad ku sugan tahay khatar, waxaad ka wici kartaa lambarka degdegga ah ee bilaashka ah 112 adigoo adeegsanaya taleefan kasta.

## WAA MAXAY WAAJIBAADKAAGA SOO DHAWEYNTA?



Waa muhiim inaad sheegto runta oo aad la shaqeyso maamulka, xitaa haddii mararka qaar ay cabsi iyo dhibaato kugu noqoto inaad sheekadaada sheegto. Adigu keliga ma tihid. Wakiilkaaga iyo saraakiishu waxay halkan u joogaan inay ku dhageystaan oo kaa caawiyaan baahiyahaaga maalinlaha ah. Shaqaaluhu way ku caawin karaan haddii ay ogyihiin xaaladaada.

Meel kasta oo aad degto, waxaa jiri doona xeerar ay tahay in la raaco. Tusaale ahaan, waa inaad ixtiraamtaa dadka kale ee deggen iyo saraakiisha, mana aha inaad buuq samayso xilliyada degganaanshaha.

Shaqaaluhu waxay sharraxi doonaan xeerarka iyo cawaaqibta ka dhalanaysa marka xeerarka la raaci waayo.

Waa muhiim in:

- ✔ aad raacdo xeerarka meesha aad degan tahay
- ✔ Waa inaad la shaqaysaa saraakiisha maamulka oo aad raacdaa tilmaamahooda.
- ✔ Waa inaad ixtiraamtaa dadka kale ee deggen, saraakiisha iyo dadka kale.
- ✔ Waa inaad u sheegtaa saraakiisha maamulka cinwaankaaga hadda iyo macluumaadkaaga xiriirka (lambarka telefoonka, e-mailka) si laguugu soo xiriiri karo mar walba.

- ✖ aadan ka baxsan goobta ay maamulku kuu sheegeen inaad joogto

- ✔ Waa inaad u hoggaansantaa sharciyada dalka, kuwaas oo ay kuu sharxi doonaan saraakiisha iyo wakiilkaaga.

## MAXAA DHACAYA HADDII AANAD U HOGAANSAMIN WAAJIBAADKAAGA?



Haddii ay sidaas dhacdo, waxaad si furan ula hadli kartaa wakiilkaaga ama saraakiisha oo aad u sharxi kartaa xaaladdaada.

Maamulka ayaa qiimeyn doona xaaladdaada waxayna ku wargelin doonaan adiga iyo wakiilkaaga haddii ay go'aansadaan inay qaadaan tallaabo kasta.

Maamulku waxaa laga yaabaa inay go'aansadaan in:

- **Waxaa laga yaabaa inaad hesho taageero yar**, tusaale ahaan, haddii aad ka cararto meesha ay maamulka ku amreen inaad degto ama haddii aadan la shaqayn mas'uuliyiinta.



- **Waxaa laga yaabaa inaad lumiso qayb ka mid ah taageerada aad heshay**, haddii aad ku dhaqanto si rabshad leh ama haddii aad si joogto ah ama si halis ah u jebiso xeerarka meesha aad degan tahay. Booliska ayaa sidoo kale la wici kartaa.

**Adigu waxaad imika Latvia kaasoo ah waddan ka tirsan EU+.**
**Waddamada EU+ waa:**

27 Dal ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czech Republic, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo

4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway iyo Switzerland.

## XEERARKA KU SAABSAN CODSASHADA ILAALINTA CAALAMIGA AH IYO U SAFARKA WADDAMADA EU+




Wakiilkaaga **iyo shaqaalaha waxay kuu sharixi doonaan sharciyadan muhiimka ah. Waxaad weydiin kartaa iyaga su'aalo wakhti kasta.**

- Waa inaad joogto Latvia oo waa inaanad u baxsan mid kamid ah waddamada EU+.
- Haddii xubno kamid ah qoyskaagu ku sugan yahay mid ka mid ah waddamadan, maamulku waxay kuu sheegi doonaan xuquuqdaada ku saabsan isu keenista qoyska. Haka iska baxsan uun.
- Haddii aad baxsato, waxa jiri doontaa cawaaqib xun, kuwaas oo lagu sharaxay buug-yarahan. Tusaale ahaan, waxaad ka heli doontaa taageero yar oo soo-dhawayn ah wadanka kale.
- Xasuusnow, waa inaad ka diiwaangelisaa codsigaaga magangelyo wadanka EU+ ee ugu horreeyay ee aad timiday, haddii maamulku aanu kuu sheegin wax kale.
- Kaliya mid kamid ah waddaman ayaa ka masuul ah inuu baadho codsigaaga magangalyo. Maamulka Latvia ayaa kuu sheegi doona wadanka arrintan ka masuulka ah.

Waxaad ku baran doontaan habraacyadan buug-yarayaal gooni ah.

# MAXAA DHACA HADDII AAD U BAXSATID MID KA MID AH WADDAMADA EU+?




**Latvia:**

- habraacaaga magangalyo doon waxaa laga yaabaa in la joojiyo.

**Inta aad joogtaan wadanka kale ee EU+ ah:**

- Maamulku waxay go'aansan karaan inay kugu celiyaan wadanka EU+ ee aad ka tagtay.

Laga bilaabo marka maamulku kugusoo wargeliyaan go'aanka lagu celinayo, waxaad waayi doontaa xuquuqaha qaarkood, tusaale ahaan:

- ma heli doontid noocyo kamid ah taageerada oo
- laguuma ogolaan doono inaad ka shaqaysato.

# YAA KU CAAWIN KARA HADDII AANAD KU QANACSANAYN GO'AANKA AY GAAREEN MAAMULKU?

Waxaad la xiriiri kartaa wakiilkaaga oo aad weydiin kartaa su'aalo kasta.

Si wadajir ah wakiilkaaga, waxaad ka raadsan kartaa caawimaad lataliye sharci.



Lataliye sharci waa qof yaqaan shuruucda dalkaas, kaasoo daraasayn kara xaaladaada oo ku caawin kara.

Shaqaaluhu waxay kuu sheegi doonaan ururada aan dawliga ahayn kuwaasoo sidoo kale ku siin kara macluumaad iyo caawimaad.




Waxaad la xidhiidhi kartaa Hay'adda Qaxootiga Qaramada Midoobay (UNHCR) wakhti kasta. UNHCR waxay ilaalisaa dadka lagu qasbay inay ka tagaan dalkooda.

## MAXAA DHACA HADDII QAAR KA MID AH TAAGEERADA LA BEDDELO?

Haddii maamulka ay go'aansadaan inay xaddidaan ama joojiyaan noocyo ka mid ah taageerada sababo la xiriira xaaladda lagu sharxay bogga 15, waxaad weli awoodi doontaa inaad:



- tagto dugsi



- aragto dhakhtar ama kalkaaliye oo aad hesho kaalmo caafimaad



- Hel caawimaad ku saleysan xaaladdaada iyo baahiyahaaga, taasoo macnaheedu yahay inaad hesho meel lagu seexdo oo ay maamulku go'aamiyeen iyo inaad hesho taageero qaar.

Marka maamulku go'aansadaan inay joojiyaan taageerada soo-dhaweynta ee lagu siiyay sababtoo ah waxaad ka carartay oo u guurtay waddan kale oo EU+ ah, nooca taageerada aad weli heli doonto wuxuu ku xirnaan doonaa xaaladdaada gaarka ah iyo baahiyahaaga. Wali waxaad awood u lahaan doontaa inaad tagto dugsi.


# FAAHFAAHINTA HALKA LAGALA XIDHIIDHAYO

Haddii aad qabtid wax su'aala ama aad u baahan tahay taageero inta lagu jiro joogistaada, waxaad la hadli kartaa shaqaalaha ka tirsan:

| **maamulka soo dhawaynta** | |
|---|---|
| | Ilaalada Xuduudaha Dowladda<br>Ciwaanka: Rūdolfa iela 5, Riga<br>tel.: +371 67913300<br>e-mail: pasts@rs.gov.lv<br>https://www.rs.gov.lv/<br><br>*Xafiiska Arrimaha Jinsiyadda iyo Socdaalka*<br>Ciwaanka: Čiekurkalna 1. līnija 1, k-3, Riga<br>tel.: +371 67209400<br>e-mail: pasts@pmlp.gov.lv<br>https://www.pmlp.gov.lv/ |

Waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa ururadan, si aad u hesho su'aalaha la xidhiidha:

| taageerada caafimaad | |
|---|---|
|  | **Adeegga Caafimaadka Qaranka**<br>Ciwaanka: Cēsu iela 31 k-3, entrance 6, Riga<br>tel.: +371 80001234<br>e-mail: nvd@vmnvd.gov.lv<br>https://www.vmnvd.gov.lv |

| taageerada bulsheedka | |
|---|---|
|  | **Lambarka Caawinta Carruurta iyo Dhalinyarada 116111**<br>Waxay bixisaa taageero nafsi ah oo loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada, sidoo kale waxay bixisaa taageero xaaladaha qalalaasaha. |

| ilaalinta carruurta | |
|---|---|
|  | **Xarunta Ilaalinta Carruurta**<br>Ciwaanka: Ventspils iela 53, Riga,<br>tel.: +371 67359128<br>E-mail: pasts@bac.gov.lv<br>https://www.bac.gov.lv<br><br>**Lambarka Caawinta Carruurta iyo Dhalinyarada 116111**<br>Waxay bixisaa taageero nafsi ah oo loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada, sidoo kale waxay bixisaa taageero xaaladaha qalalaasaha. |

## khadka caawinta carruurta khatarka ku jirta



Haddii aad dareento dayac ama inaad ku jirto khatar waxaad wici kartaa 119 si bilaash ah.

Haddii walaalkaa, walaashaa, ama saaxiibkaa uu maqan yahay, waxaad wici kartaa Khadka bilaashka ah 116 000 - Carruurta Maqan ee Yurub Joogta

## latalin sharci, kaalmada iyo matalaada



Maamulka Maxkamadaha
Ciwaanka: Antonijas iela 6, Riga
tel.: +371 67063800
e-mail: pasts@ta.gov.lv
https://www.ta.gov.lv/

## Hay’adda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR)

waxay ilaalisaa danaha iyo xuquuqaha magangalyo doonka iyo qaxoontiga




UNHCR (Hay’adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga)
Ciwaanka: Antonijas iela 9, Riga
tel.: +46 10 101 28 00
e-mail: swest@unhcr.org,
https://www.unhcr.org/

| | |
|---|---|
| **Aasaaska Isdhexgalka Bulshada – Adeeg Hal-joogsi** | Xarumaha adeegga macaamiisha Adeeg Hal-joogsi<br>Ciwaanka:<br>Raiņa bulvāris 15, Riga, tel.: +371 26959706<br>Rožu iela 6, Liepāja, tel.: +371 22811020<br>Ģimnāzijas iela 11, Daugavpils, tel.: +371 29557630<br>https://livelatvia.lv/ |
| **Xarunta Xuquuqda Aadanaha ee Latvia** | Ciwaanka: Alberta iela 13, Riga<br>tel.: +371 67039290<br>e-mail: office@humanrights.org.lv<br>https://cilvektiesibas.org.lv/ |

Haddii aad la kulanto xaalad caafimaad oo degdeg ah ama aad halis ku jirto, la xidhiidh shaqaalaha. Way ku caawin doonaan.

Haddii ay dhacdo in adigoo jooga meel ka baxsan halka aad degan tahay oo aad shil la kulanto ama aad halis gasho, waxaad wici kartaa lambarkan gargaarka degdega ah lambaradan gargaarka degdega ah si bilaash ah:

**adeegyada caafimaadka degdegga ah iyo booliska: 112**

Haddii aanad haysan telefoon, waxaad weydiin kartaa qof kale inuu kuu waco lambarka gurmadka.

Buug-yarahaan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuro xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalkan, waxaana EUAA oo keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, taas oo loogu talagalay dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas’uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas’uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas’uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025